



WARSIDAHHA SADDEX BILOOD LAHA AH EE GKDPL

Warsidaha 02

October 2020

Farriinta ka socota Guddiga: Dulmarka Guud ee Qaab Dhismeedka Sharciga Doorashada

Geeddi-socodka nabadeed ee doorashooyinka waxaa muhiim u ah in la helo qaab-dhismeed sharciyeed iswaafaqsan oo isdaba-joog leh. Qaab dhismeedka sharciga doorashada wuxuu ka kooban yahay Dastuurka iyo Sharciyada kale ee la xiriira, waxaana kaabaaya xeerarka iyo qawaaniinta TPEC ee gudaha iyo xeerarka anshaxa ee wada xukumaya howlaha doorashooyinka.

Dowlad Goboleedka Puntland, sharciyada la xiriira diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha doorashooyinka dowladaha hoose waxaa ka mid ah:

1. Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya.
2. Golayaasha Deegaanka ee Dawladda Puntland (Xeerarka) Sharciga;
3. Sharciga guddiga doorashada Puntland.
4. Sharciga doorashada goleyaasha deegaanka ee Puntland.
5. Sharciga Xisbiyada/Ururrada Siyaasadeed.
6. Sharciga Diiwaangelinta Cod-bixiyaha (Qabyo qoraal hadda horyaala golaha wasiirrada).

Marka lagu daro agabyadan sharciyeed ee rasmiga ah, waxaa jira habraacyo iyo xeerar kale oo kaabaaya sharciyada guud ee doorashada. U diyaar garowga doorashooyinka Dowladaha Hoose ee hordhaca ah ee soo socda waxaa qayb ka ah diyaarinta hagayaa-sha lagama maarmaan ka u ah hawlaha doorashada oo TPEC durba-ba ka hawl gashay, waxaana ka mid ah:

Xeerarka Anshaxa

TPEC waxay horumarin doontaa xeerarka anshaxa ee shaqada diiwaangelinta codbixiyaha iyo hawlaha la xiriira doorashada dawladdaha hoose ee degmooyinka la soo horumarshay, waxaana jiri doona xeerar u gaar ah maamulida hab-dhaqanno ururada siyaasadeed iyo warbaahintaba. Xeerarka anshaxu waxay dejinayaan halbeegyada ay tahay in daneeyayaasha doorashadu ay u hogaansamaan inta hawshu socoto, waxaana lagu qaadi karaa ciqaab ciddii aan u hoggaansamin oo aan raacin xeerar lagu heshiiyey. Xeerarka anshaxa waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo geeddi-socodka doorashadu ku socdaan si nabad ah oo xalaal ah iyo in dhammaan daneeyayaasha lola dhaqmo hab ku dhisan cadaalad. Xeerarka anshaxa sidoo kale waxaa loo faafin doonaa si weyn oo suurta galisa in dadweynuhu ay ka warqabaan xeerarka lagu xukumayo doorashada, habdhaqanka warbaahinta iyo ururada siyaasada.

Nidaamka Xallinta Khilaafaadka

Nidaamka xallinta khilaafaadka waxaa lagu soo gudbin doonaa qaab-dhismeed sharci iyo nidaam ay dejiso TPEC, wuxuu noqon doonaa mid lagu maareeyo dhammaan cabashooyinka la xiriira diiwaangelinta iyo codeynta doorashada. Sharciyada ayaa hagaya qaabka TPEC ay u maaraynayso cabashooyinka ka imanaya xarumaha diiwaangelinta codbixiyeyaasha / xarumaha codbixinta iyo cabashooyinka toos u yimaada xarunta dhexe ee TPEC iyo sidoo kale, cabashooyin toos loogu gudbiyo Garsoorka.



Sawirka 1aad: Xubin Guddiga ka mid ah (Cabdirisaaq Axmed) oo dadweynaha la hadlaya

Hagaha isku-dhafka jinsiga

TPEC waxaa ka go'an in loo sinnaado fursadaha ka-qaybgalka howlaha doorashooyinka, gaar ahaan haweenka, sidaas darteedna waxay dejineysaa tilmaamo iyo habraacyo lagu dhiirrigelinayo ka-qaybgalka haweenka. Waxaa dhiiri galintaa laga bilaabayaa heerka hay'adeed ee TPEC (Xarunta iyo Shaqaalaha kala duwan), iyo iyada oo la hubinaayo ka-qaybgalka haweenka doorashooyinka goleyaasha deegaanka ee soo socda.

Tub-bixiyaha Waxbarashada Codbixiyaha

Waxbarashada cod bixiyayaashu waa aaladda ugu muhiimsan ee lagu hubiyo in qof kastaa ka qayb qaadan karo geeddi-socodka doorashooyinka, qof walbana ka warqabo xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa. TPEC waxay horumarinaysaa hagaha wacyigelinta codbixiyaha si loo hubiyo in macluumaadka saxda ah ee waqtiga ku habboon ay gaaraan qof walba oo ku nool Puntland.

Hagaha Korjoogteynta Doorashada

Kormeerayaasha doorashooyinka maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba waxay kormeeraan hannaanka doorashada, waxayna gacan ka geystaan sidi loo hubin lahaa kalsoonida lagu qabo iyo sharcinimadeeda. Warbixintooda iyo indha indhayntoodu sidoo kale waxay noqon kartaa halbeeg muhiim u ah yareynta khilaafaadka xilliga doorashada kadib. Si doorkan loo ciyaaro, kormeerayaasha doorashada waxaa hagi doona habraacyo iyo tilmaamo cad oo ku saabsan waxa ay ka qaban karaan iyo wixii aan ka qaban karin gudaha goobta codbixinta iyo xarumaha diiwaangelinta codbixiyeyaasha. TPEC waxay hadda gacanta ku haysaa diyaarinta halbeegyada iyo habraacyada muhiimka u ah shaqada doorashada.

Diiwaangelinta Codbixiyaha iyo Habraacyada Doorashada Goleyaasha deegaanka

Ugu dambeyntiina, Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha soo socda iyo hannaanka Doorashada Golayaasha deegaanka la soo horumarshay, waxay u baahan doonaan qorista boqollaal shaqaale ah oo ay tahay inay raacaan isla siyaasadaha iyo habraacyada u degsan shaqada. TPEC waxay horumarin doontaa buugaag tababar oo faahfaahsan oo loogu talagalay dhammaan shaqaalaha si loo hubiyo in dhammaan shaqaaluhu ka warqabaan oo ay awoodaan inay hirgeliyaan dhammaan sharciyada iyo xeerarka khuseeya shaqada loo igmaday.

GUDDAHA WARSIDAHHA:

- Guulaha la gaaray
- Shaqooyinka soo socda

Guulaha la gaaray 3dii bilood ee lasoo dhaafay:

Hubinta Diiwaangalinta Ururada Siyaasadeed

1 - 15 Luulyo, Guddiga KMG ee Doorashooyinku wuxuu booqday dhammaan sagaalka gobol ee maamulka Puntland si ay u kormeeraan xafiisyada cusub ee dhawaan ka furteen ururada siyaasadeed ee kumeelgaarka ah. Muddadaas, ayaa Guddigu wuxuu kormeeray in kabadan 80 xafiis, wuxuu buuxiyey foomamka qiimeynta wuxuuna ku saxiixay isla goobta si kor loogu qaado furfurnaanta iyo daah furnaanta.

Ka dib booqashooyinka kormeerka, hawladeenada Guddigu waxa ay waceen intii u dhexaysay 2-22 July in ka badan 26000 oo ka mid ah taageerayaasha ururada siyaasada, si loo xaqiijiyo inay taageereen urur siyaasadeed ka soo ku soo gudbiyey liiska taageerayaashiisa. Xaqiijinta wicitaankan taleefan waxaa sababay covid-19 oo ka dhigtay wax aan macquul aheyn in qof ahaan loo soo booqdo taageere kasta. Wacitaankan sidoo kale waxa uu xaqiijiyey in taageerayaashu aysan taageerin in ka badan hal urur siyaasadeed, sidoo kale waxa la xaqiijiyey da 'iyo goobaha taageerayaasha ururada siyaasada.



Sawirka 2aad: Guddiga oo ansixinaya Ururada Siyaasadda

Tallaabadii ugu dambaysay, TPEC waxay eegtay Kulamadii Guud ee ay qabteen urur siyaasadeed kasta oo ku meelgaar ah u diiwaangashan. Guddigu ayaa isku daray dhamaan natiijooyinka iyo dukumiintiyada ay soo gudbiyeen ururada siyaasadeed si loo xaqiijiyo, loona hubiyo inay buuxiyeen shuruudihii sharci .

Ku dhawaaqista iyo Shahaadada siinta Ururada Siyaasadeed

Kadib nidaamka kala shaandheynta, 1da Ogosto 2020 guddigu waxa uu ku dhawaaqay in 10 urur siyaasadeed ay buuxiyeen shuruudii uu dhigayey sharciga diiwaangalinta ururada siyaasadeed. Ururada siyaasadeed ee buuxiyey shuruudana waxaa loo diiwaangaliyey si rasmi ah. Waana kuwaan hoos ku xusan:

1. Urur siyaasadeedka Run iyo Cadaalad
2. Ururka siyaasadeedka Shaqaalaha
3. Urur siyaasadeedka dhalinyarada
4. Urur siyaasadeedka Cadaalad iyo Sinaan
5. Urur siyaasadeedka Kaah
6. Urur siyaasadeedka Mideeye
7. Ururka Siyaasadeedka Mustaqbal
8. Urur siyaasadeedka Himilo
9. Urur siyaasadeedka Horseed
10. Urur siyaasadeedka Ifiye



Sawirka 4aad: Xafaladdii shaacinta liiska Ururada

10-ka urur siyaasadeed waxaa lagu dhawaaqay xaflad rasmi ah oo ay soo qabanqaabiyeen guddiga doorashooyinka ku meel gaarka ah ee Puntland, waxaana lagu qabtay magaalada garoowe 15 Ogosto 2020. xaflada waxaa ka soo qayb galay madaxweyne ku xigeenka puntland mudane Axmed Cilmi Cismaan iyo laba Madaxweyne oo hore ee Puntland oo kala ah Mudane Cabdiweli Maxamed Cali iyo Cabdiraxmaan Maxamed Faroole. Xafladda waxaa sidoo kale ka soo qaybgalay wakiillada ururrada siyaasadda, xubno ka tirsan Golaha Shacabka, golaha wasiirrada, iyo ururrada bulshada rayidka ah. Kadib khudbado ay jeediyeen dhamaan ururada siyaasada waxaa guddigu gudoonsiiyay shahaadooyinka diiwaanfalinta iyada oo uu horumuud ka yahay gudoomiyaha guddiga mudane Guuleed Saalax Barre.



Sawirka 3aad: Xafaladdii shaacinta liiska Ururada

Tababarka wacyigalinta Ururada Siyaasadeed

18-19 Ogosto Guddiga KMG Doorashooyinka oo kaashanaaya Xarunta Cilmi-baarista ee PDRC ayaa abaabulay tababar Laba maalmood ah oo aqoon isweydaarsi ku saabsan khuseeya ururada siyaasada iyo tababarba loogu sameeyey 50 qof oo ka kala socday 10 ka urur siyaasadeed ee la diiwaan gashay. Ujeeddada aqoon isweydaarsiga tababarka ayaa ahayd in in kor loo qaado fahanka ururada siyaasadeed ee la xiriira xeerarka doorashooyinka. Mudadii tababarku socdayna waxaa dooda badan laga yeeshay mawaadiicdaan hoos ku xusan:

1. Taariikhda Xisbiyada Siyaasadeed ee Soomaaliya 1960 - Waxaa soo jeediyey Axmed Cabaas oo katirsan PDRC.
2. Xisbiyada Siyaasadeed iyo qaab-dhismeedka Federaalka - Waxaa soo jeediyey
3. Abdulkatir Yusuf oo ka socda MAX Planck foundation
4. Guud-marka Xeerarka iyo Sharciyada Doorashooyinka Puntland - Waxaa soo jeediyey Cabdirisaaq Axmed oo ah xubin ka tirsan Guddiga Doorashooyinka TPEC
5. Wareegga iyo hawlaha Doorashada Golayaasha Deegaanka ee Puntland - Waxaa soo jeediyey Xasan Ciise Sharmaarke oo ka socda hay'adda Interpeace
6. Ka Qaybgalka Haweenka ee Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka - Waxaa soo Jeediyey Aamina Maxamed oo ka socota PDRC.



Sawirka 5aad: Guddiga oo shir kula jira Ururada Bulshada

Daahfurka Qandaraaska Qalabka Diwangalinta Codbixiyaha (Biometric System)

6dii Oktoobar, TPEC waxay soo bandhigtay qandaraaska nidaamka diiwaangelinta cod-bixiyayaasha. Tartanku wuxuu u furan yahay dhammaan shirkadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah. Shirkadaha daneynaya waa inay soo gudbiyaan soo jeedintooda ku saabsan qalabka iyo softiweerka diinwaangelinta ugu dambeyn 5 Nofeembar 2020. Faahfaahinta iyo dukumiintiyada qandaraaska waxaa laga heli karaa <https://tpec.pl.so/jobs-and-announcements/>.

Shirka Billaha ee Bulshada Rayidka ah iyo Ururada Siyaasada

6dii Sebtember TPEC waxay qabatay kulan kii ugu horeeyey ay la yeelatay bulshada rayidka ah muddo afar bilood ah kaddib, iyada oo loo qaban waayey muddoyinka sababo la xiriira Covid-19. Guddigu wuxuu xubnaha bulshada rayidka ah uga warbixiyay horumarka laga sameeyay u diyaargarowga doorashada waxayna ka weydiisteen

taageeradooda iyo wax ku biirintooda wacyigalinta iyo ka qaybgalka bulshada.

Xubnaha bulshada rayidka ah, oo ay horkacayaan daladda Ururada Aan Dawliga Ahayn ee Puntland (PUNSAA), waxay isku xilqaameen wacyi galin iyagoo adeegsanaya fagaarayaasha iyo wadaaga fariimaha muhiimka ah. Kaqaybgalayaashu waxay kaloo isku raaceen ahmiyada ay leedahay horumarinta hagayaal la xiriira waxbarashada cod-bixiyaha iyo buug-gacmeedka si loo hubiyo in macluumaad sax ah la siiyo muwaadiniinta reer Puntland. Ugu dambayntii, jaamacadaha iyo machadyada cilmi baarista waxay kaloo ballanqaadeen inay taageerayaan qabashada shirar ay la yeeshaan ardayda jaamacadaha si loo horumariyo fahamkooda arrimaha Doorashada Dowladaha Hoose ee Puntland. TPEC waxay sidoo kale kulankeedii ugu horeeyey ee billaha ah la yeelatay ururada siyaasada si ay ugala hadasho wadada loo marayo, isla markaana loogu soo gudbinaayo tabashooyinka iyo talooyinkaba .

Hawlgallada Deeq Bixiyaasha

4tii Sebtember 2020 Guddoomiyaha TPEC Mr Guuleed Saalax ayaa kula kulmay magaalada Nairobi deeq-bixiyeyaasha wuxuuna u soo bandhigay waxyaabaha u qabsomay guddiga, yoolalka iyo howlaha u qorsheysan. Deeq-bixiyeyaasha waxaa dhiirigaliyay dadaallada dowladda Puntland ee ah in la qabto doorashadii ugu horreysay ee hal qof iyo hal cod. Kulankan waxaa ka soo qeyb galay Midowga Yurub, Sweden, Switzerland, Denmark, SAHAN iyo Sanduuqa xasilloonida Soomaaliya. Gudoomiyaha ayaa sidoo kale kulamo laqaatay deeq bixiyaasha dhamaan si gaar gaar ah. Dhinacyada ayaa isku raacay in lasii wado taageerida tubta Puntland ee ah in hal qof iyo hal cod la hirgaliyo sanado dheer kaddib asaaskii Puntland s



Sawirka 6aad: Guddoomiyaha Guddiga oo Nairobi kula kulmay deeq bixiyeyaasha

Ka qayb-galinta Bulshada

Laga bilaabo 20ka Sebtember ilaa 29ka Sebtember 2020, Guddigu waxa uu abaabul wacyigalin ah ka qabtay degmada Qardho ee Gobolka Karkaar, iyo degmada Badhan ee gobolka Sanaag.

Xubno ka mid ah guddiga ayaa kulamo la yeeshay Ururada Bulshada Rayidka ah, Dhalinyarada iyo Ardayda Jaamacadaha iyo Haweenka. Guddigu waxa uu fagaarayaal kala duwan kula wadaagay waxqabadkiisa, qorshayaasha horyaala, iyo waxa laga rabo qaybaha kala duwan ee bulshada ee ku aadan geedi socodka doorashada. Waxaa xusid mudan in ay kulamadaa ka qayb galeen ururada siyaasadeed ee degmooyinka joogay .



Sawirka 8aad: Guddiga oo shir kula jira Xubno ka socda bulshada rayidka ah



Sawirka 7aad: Guddiga oo shir kula jira Xubno ka socda bulshada rayidka ah



Sawirka 9aad: Guddiga oo shir kula jira Xubno ka socda bulshada rayidka ah

TALAABOYINKA SOO SOCDA:

- Dhameystirka geedi-socodka soohdimaha Degmooyinka.
- Diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha degmooyinka doorashada hordhaca ah.
- U diyaar garowga doorashooyinka hordhaca ah.